San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Gu' ga 2004

Adeegyada Booliiska ee San Diego City Schools

Adeegyada Booliiska Dugsiyadu waxay hada leeyihiin 37 saraakiil booliis ah oo si buuxda loo dhaariyey, 22 oo ah saraakiisha beesha u adeegta, iyo 11 shaqaalaha kaaliyaasha ah. Dhammaan dugsiyada sare waxaa ka hawlgala saraakiil booliis ah oo si buuxda loo dhaariyey, iyo mid dheeraad ah oo (Gompers) jooga. 22 dugsi ee dhexe iyo dhexe-sare waxaa ka hawlgala afar sarkaal oo wakhti buuxa shaqeeya.

Dugsiyada dhexe iyo dhexe-sare waxay saraakiisha lagu meeleynayo ku xidhan tahay hadba tirada adeegyada loo soo wacdo iyo tira-koobka dhacdooyinka. Saraakiisha beeshu waxay wakhti buuxa ka shaqeeyaan dhismeyaasha dugsiyada hoose. Toddoba sarkaal oo wakhti buuxa shaqeeya ayaa dusha ka waardiyeeya dusiyada degmada oo dhan, iyagoo marka la soo wacana ka jawaab celiya.

Adeegyada Booliiska Dugsiyada waxaa xarunta xidhiidhada ee 24-saac shaqeysa bil kasta la soo wacaa 13,000 oo jeer. Telefoonadaas la soo waco waxay dhalin karaan celcelis ah 1,862 jeer oo bil kasta loo soo waco adeegga booliiska. Waxaa bil kasta saraakiisha Booliiska Dugsiyada loo soo diraa celcelis ahaan 1,564 telefoon, halka Booliiska San Diego la soo waco 298 jeer.

OO KOOBAN

Adeegyada Booliiska Dugsiyadu wuxuu dugsiyada degmada u horseedaa inay qorsheeyaan badbaadada iyo nabadgelyada, farsamada casriga ah iyo tababarada

Adeegyada Booliiska Dugsiyadu waxay leeyihiin:

- **37 sarkaal oo booliis ah**
- **22 saraakiisha beesha ah**
- **14 shaqaalaha kaaliyaasha ah**

Qorshaha u Diyaargarowga Badbaadada iyo Nabadgelyada

Dugsi kasta waxaa laga rabaa inuu soo qoro, isla mar ahaantaasna, xafido Qorshaha Nabadgelyada Dugsiga oo Dhammeystiran, kaas oo ka kooban xaaladaha degdegga ah, u diyaargarowga masiibada iyo falalka dembiyada xambaarsan ee waxyeeleyn kara nabadgelyada ardeyda iyo shaqaalaha, waxaa intaas weheliya waxyaabaha la xidhiidha dhibaateynta, nidaamka dhar qaadashada, fara-xumeynta ilmaha iyo dembiyada nacaybka. Waxaa kaloo dugsi kasta looga baahan yahay inuu xafido Sanduuqyada Xaaladaha Qallafsan looga Jawaab-celiyo, kaas oo ay ku jirto nidaamka aaga looga baxo marka ay xaalad degdeg ah timaado, sawirada hawada laga qaado iyo khariidada dugsiga, dikoomentiga tilmaameya meelaha muhimka ah sida korontada, gaaska, biyaha, iwm., shaqaalaha iyo ardeyda dugsiga kormeera, iyo waxyaabo kale oo badan. Nidaamka xaaladaha degdegga ah ee guud ahaan degmada waxaa ka mid ah inay si macquul ah uga hortegaan waxyaabaha ay ka midka yihiin argagixisada, af-duubista, toogashada, iyo dugsiga oo albaabada loo xidho. Adeegyada Booliiska Dugsigu wuxuu si wadajir ah ula shaqeeyaa ha'ayadaha dawlada-dhexe, dawlad-goboleedka iyo kuwa deegaanka. Waxay kaloo ku tiirsan yihiin oo kaalmo ka helaan waalidiinta, ardeyda iyo xubnaha jaaliyada si ay uga caawiyaan barnaamijyada ku saabsan *Qeybta Booliiska Iskaa-wax-u-qabso ku shaqeeya ee Kormeerta Kana hortegga Dembiyada Dugsiyada ka dhaca,* iyo *Dugsiga* iyo *Ilaalinta Carruurta*. Waxaa ardeyda fasalka dhexdiisa loogu soo bandhigaa arrimo ku saabsan nabadgelyada dugsiga, ka fejignaanta maandooriyaasha, budh-cada, sharciga, iwm.

Tiknoolojiyada u Diyaargarowga Badbaadada iyo Nabadgelyada

Adeegyada Booliiska Dugsiga waxay dhammaan degmada ka sameeyeen hab sawir fiidiyo ah oo wax sawirta, duubtana. Waxay kaloo dugsiyada la tashi kala sameeyeen raadiyaasha lagu wada hadlo ee dugsiyada yaal, kaas oo macallimiinta iyo maamulaha ka caawineya in dugsiga lagu wada xidhiidho, kaas oo aad muhim ugu yahay nabadgelyada iyo badbaadada dugsiga. Adeegyada Booliiska waxay kaloo masuul ka yihiin xafidista iyo kormeerista qalabka loogu talagalay dabka iyo waxyaabaha soo dhex-gala qalabka digniinta bixiya.

Tababarka u Diyaargarowga Badbaadada iyo Nabadgelyada

Adeegyada Booliisku waxay tababaro u fidiyaan maamuleyaasha, maamuleyaasha goobta, macallimiinta iyo shaqaalaha, shaqaalaha cusub ee la qaatey, kaaliyaha nabadgelyada ee dhismaha sidii ay ugu diyaargaroobaan xaaladaha degdegga ah, maareynta masiibada, qiimeynta khatarta, ka bixista dhismaha iyo xeeladaha meel loogu kulmo. Iyo weliba sidii shaqaalaha goobta loogu tababari lahaa hirgelinta qorshaha nabadgelyada. Agaasimeyaasha xafiiska xarunta dhexe waxaa la siiyaa tababaro ku saabsan Xarunta Hawlaha Xaaladaha Degdegga ah, taas oo u adeegeysa xarunta dhexe marka ay xaalad degdeg ah ku timaado, iyo shaqaalaha degmada oo loo tababaro waxay sameyn lahaayeen marka ay xaalad degdeg ah dhacdo. Saraakiisha Booliiska ee Dugsiyada waxaa la siiyaa tababaradii ugu dambeeyey ee ka hortega dembiyada iyo xeeladihii lagaga hortegi lahaa masiibooyinka, taas oo ay inta badan la xidhiidheyaan shaqaalaha Waaxda Booliiska ee San Diego.

Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Adeegyada Booliiska San Diego, waxaad ka fiirisaa shabakada Internetka oo ah: (http://prod031.sandi.net/policeservices/).

SOMALI VERSION: SCHOOL POLICE SERVICES

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Warbixinada kala xidhiidh: Waaxda Adeegyada Booliiska: (619) 725-7000 Maamulka (619) 291-7678 Diritaanka
Su'aalaha warbaahinta: (619) 725-5578 **www.sandi.net**

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."